Maalgashiga Xaqsoorka Diiradda Saarayo

Oregon waxay codsanaysaa maalgelin federaal oo ka caawiso buuxinta duleelada ka jira xaqsoorka caafimaadka ee xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) ee gobolka oo dhan. In kasta oo ballanqaadkii Oregon ee ahaa in la yareeyo kororka kharashka daryeelka caafimaadka ee gobolka oo dhan uu keydiyey lacago federaal oo badan oo geli lahayd dhammaan suuqyada kala duwan isla markaana uu sare u qaaday tayada, hadana natiijooyinka caafimaadku ayaa kala duwan marka lagu saleeyo jinsiyada iyo qowmiyada. Intaas waxaa dheer, horumarinadu si fiican wax ugama aysan qaban xaqsoor la'aanta caafimaad ee ka dhalatay cunsuriyadda iyo dulmiga muddada dheer soo jiray. Sidaa awgeed, iyadoo qayb ka ah iskaashiga udhaxeeyo federaalka iyo gobolkayaga, Oregon waxay CMS ka codsanaysaa inay siiso maalgelin federaal oo hordhac ah oo ku aaddan dadaallada ku salaysan bulshada ee diiradda saarayo baabi'inta u xaqsoor la'aanta caafimaadka ee xubnaha OHP. Oregon waxay rajaynaysaa in maalgashiyada ku salaysan bulshadu ay wanaajin doonaan caafimaadka dadka ay waxyeeleeya ugu badan ka soo gaartay xaqsoor la'aanta caafimaad,[1] iyo in sidoo kale ay wax ka qaban doonaan arimaha ku saabsan bulshada ee gacan ka geysto go'aaminta caafimaadka. Labadan faa'iido waxay u horseedi doonaan in uu yaraado kharashka ka baxayo dawladda gobolka iyo dawladda federaalka.

Oregon waxay kaloo codsanaysaa in kharashyada hay'adda daryeelka la isku-duway (CCO) ee wax looga qabanayo xaqsoor la'aanta caafimaadka loo tixgeliyo inay yihiin sheegashooyin caafimaad ama kharashaad ku baxay wanaajinta tayada marka la eegayo miisaaniyadda guud ee ku salaysan qiimaha. Sababta tani loo sameynayo waa ujeeddooyin la xiriira dejinta sicirka, sameynta miisaaniyadda, iyo saamiga khasaaraha caafimaad (MLR). Codsigan waxaa hagay/bixiyay Golaha Sharci-dejinta ee Gobolka Oregon (HB 3353)[2] bishii Luulyo 2021. (Eeg warqadda fikradda *Miisaaniyadda Guud ee ku saleysan Qiimaha* si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan codsigan.)

1. Maalgelin federaal oo cusub oo diiradda saareyso sare u-qaadida xaqsoorka caafimaadka, oo ay ku jirta maalgelino lagu dhisayo kaabayaal si loo taageero hawlaha wax looga qabanayo xaqsoorka caafimaadka; si loo taageero hawlaha wax looga qabanayo xaqsoorka caafimaadka iyo dadaallada gobolka oo dhan ee ay hoggaamiso bulshada; si iskaashatooyinka ay bulshadu hormuudka u tahay loo siiyo dhaqaale ay ku maalgeliyaan xaqsoorka caafimaadka.

Si loo hirgeliyo maalgalintan federaaliga ah, **Oregon waxay codsanaysaa awoodaha kharash-gareynta ee soo socda:**

2. Awoodda kharashaadka ee lagu yareynayo kharashka federaal ee ku baxa Medicaid si wax looga qabto Waxyaabaha Kusaabsan Bulshada ee Gacan Ka Geysto Caafimaadka (SDOH) ee xubnaha OHP ee la tacaalayo isbeddel nololeed ama carqalado sida lagu sharraxay *Wanaajinta Natiijooyinka Caafimaadka iyadoo la Nidaaminayo Kala-guurka Nolosha Iyo Caymiska* ee ku jirta warqadda cilmi-baarista.

---

[1] Dadweynaha iyo bulshooyinka ay waxyeellada ugu badan ka soo gaartay caddaalad-darrooyinka taariikhiga ah iyo kuwa hadda jira iyo xaqsoor la'aanta caafimaadka waxaa ka mid ah laakiin kuma koobna Qabiilda iyo bulshooyinka Qabiilka; Latino/a/x, Madowga/Afrikaanka Maraykanka ah, Aasiyaanka, Reer Jasiirada Baasifik, iyo Hindida Maraykanka/Dadka Dhaladka Alaska, iyo bulshooyinka kale ee midabka leh; dadka naafada ah; dadka aqoontooda Ingiriisiga ay xadidan tahay; iyo bulshooyinka soo-galootiga iyo qaxootiga.

[2] https://olis.oregonlegislature.gov/liz/2021R1/Downloads/MeasureDocument/HB3353/Enrolled

3. Awoodda saamaxayso in maalgelinta CCO ee xaqsoorka caafimaadka ee uu u baahan yahay HB 3353 iyo sida lagu qeexay *Wanaajinta Natiijooyinka Caafimaadka iyadoo la Nidaaminayo Kala-guurka Nolosha Iyo Caymiska ee ku jirta warqadda cilmi-baarista* si loo tixgeliyo inay tahay sheegashooyin caafimaad ama kharashaadka wanaajinta tayada iyadoo ujeeddooyinka yihiin dejinta sicirka CCO.

Si aad u aragto dhammaan xeeladaha la soo jeediyay, fadlan eeg bogga 8-aad.

Dhibaatada iyo araarta

Xaqsoor la'aanta caafimaadka

Waxaa inta badan la wada oggol yahay in caafimaadka aysan badanaa go'aaminin daryeelka caafimaad ee dadku helaan balse waxyaabo kusaabsan bulshada oo gacan ka geysto go'aaminta caafimaadka, oo ay ku jiraan arrimo ay ka mid yihiin degaanada la dhisay iyo guriyeynta, helida cunto caafimaad leh iyo goobo cagaar ah, fursadada shaqo iyo dakhliga.[3] Dadka midabka leh iyo kuwa haysto khayraadyo dhaqaale oo yar ayay u badan tahay inay wajahaan deggaan aan badqab ahayn, guryo aan tayo lahayn, gaadiid la'aan, nidaamka cadaaladeed ee dembiyada, iyo dugsiyo tayadoodu hooseyso, taasoo macnaheedu yahay inay u badan tahay inay wajahayaan natiijooyin caafimaad oo xunxun, iyo cimri gaaban.

Qeexitaanka xaqsoorka caafimaadka Oregon

Oregon waxay aasaasi laheyd nidaam caafimaad ee abuuro xaqsoorka caafimaadka markii dadka oo dhan ay gaari karaan filashadooda caafimaadka buuxo iyo fayo qabka oo aan hoos loogu dhigin jinsiyadooda, qowmiyada, luuqada, curyaannimada, da'da, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, dooqa galmada, heerka bulshada, xaduudaha ka midka ah bulshooyinkaan ama aqoonsiyada, ama xaaladaha kale ee bulsha ahaan loo go'aansaday.

Gaarista xaqsoorka caafimaadka waxay u baahantahay wada shaqeynta joogtada ah ee dhammaan gobolada iyo waaxyada gobolka, oo ay ku jiraan dowladaha qabiileedka inay sheegaan:

- Baahinta simman ama dib u qeybinta kheyraadka iyo awoodda; iyo
- Aqoonsashada, dib u heshiisiinta iyo saxitaanka taariiqda iyo cadaala darada casriga ah.

In kasta oo gudaha gobolka Oregon oo dhan ay helida caymiska caafimaadka iyo daryeelka kor uga kacday, xaqsoor la'aanta caafimaadku ayaa sii jirtaa maxaa yeelay nidaamyo iyo hay'ado ayaa loo sameeyay inay u faa'iideeyaan koox dad ah oo khaas ah in muddo ah. Xaqsoor la'aanta caafimaadku waxay salka ku hayaan helitaanka awoodda oo aan loo sinnayn, kheyraadyada, fursadaha iyo go'aan gaarista ka dhalanayo cunsuriyad iyo cadaadis muddo dheer soo jiray, caddaalad-darro bulsheed, xag-jirnimo, eexasho, takoor iyo gumeysi soo jiray waqti dheer. Bulshooyinka midabka leh iyo bulshooyinka Qabiilada waxay la kulmeen maalgelin yar oo joogto ah, taasoo dhalisay inay sii xumaanayaan waxyaabha kusaabsan bulshada ee gacanta ka geysto go'aaminta caafimaadka bulshada iyo in natiijooyinkooda caafimaad ka xun yihiin kuwa dhiggooda caddaanka ah. Xaqsoor la'aantaan waxay sidoo kale keentaa culays dhaqaale. Qiyaastii 31% kharashyada daryeelka caafimaadku waxay ka dhashaan xaqsoor la'aanta caafimaad oo ay sababtay cunsuriyad iyo cadaadis

[3] Magnan, S. (2017). Waxyaabaha Gacanta Ka Geysto Go'aaminta Caafimaadka 101 ee Daryeelka Caafimaadka: Five Plus Five. Akademiyadda Qaranka ee Caafimaadka (National Academy of Medicine). Laga heli karo: https://nam.edu/social-determinants-of-health-101-for-health-care-five-plus-five/

nidaamsan.[4] Qiimeynta Caafimaadka Gobolka Oregon ee 2018 waxay[5] muujisay xaqsoor la'aan quseyso waxyaabaha soo socda ee ku saabsan bulshada ee gacan ka geysto go'aaminta caafimaadka bulshada:

Saboolnimada iyo yarida cuntada

- Ku dhowaad dhammaan kooxaha jinsiyadaha iyo qowmiyadaha ku nool Oregon waxay leeyihiin heerar saboolnimo oo sareeya marka loo eego heerka guud ahaan dalka Mareykanka, gaar ahaan dadka loo aqoonsan inay yihiin Afrikaanka Mareykanka ah.
- Oregon waxay ku jirtaa kaalinta 44-aad ee dalka marka la eego dhanka yarida cuntada. Cunno yarida waxay ku badan tahay bulshooyinka miyiga, bulshooyinka midabka leh, qoysaska carruurta leh, iyo kiraystayaasha.

Guriyeynta iyo hoy la'aanta

- Saddex meelood hal meel ee dhammaan qoysaska Afrikaanka Maraykanka ah waxay in ka badan 50% dakhligooda ku bixiyaan kharashyada guryaha, marka la barbardhigo qiyaasta ah 17% ee dhammaan qoysaska ku nool gobolka.
- Kaliya 32% dadka Afrikaanka Mareykanka ah ee ku nool degmada ugu dadka badan ee Oregon ayaa lahaayeen guryo sanadkii 2010, marka la barbardhigo 60% ah dadka caddaanka ah ee ku nool degmada.
- Marka laga reebo dadka isku aqoonsan inay yihiin Aasiyaan, dadka midabka leh waxay la kulmaan hoy la'aan daran marka la barbardhigo dhiggooda caddaanka ah.

Xabis-gelinta

- Gudaha Oregon, dadka midabka leh ayay u badan tahay in la xabiso marka la barbardhigo dadka caddaanka ah:
    - Afrikaanka Maraykanka ah ayay 4.6 jeer u badan tahay in la xabiso
    - Dadka Dhaladka Maraykanka ayay 1.8 jeer u badan tahay in la xabiso
    - Dadka Latino/a/x ah ayay 1.4 jeer u badan tahay in la xabiso

COVID-19

Safmareenka COVID-19 wuxuu hoosta ka xarriiqay xaqsoor la'aanta caafimaadka ee kajirta Oregon waxayna tani baraarujin u tahay inta ay dhan tahay xaqsoor la'aanta.

- Dadka reer Hispanic ee Oregon waa kaliya 12% dadweynaha Oregon laakiin waxay matalaan in ka badan 18% dadka uu ku dhacay COVID-19.[6]
- Dadka Madowga ah ee Oregon ayay 3.1 jeer u badan tahay in cudurka COVID-19 isbitaal loo dhigo marka la barbardhigo dhiggooda caddaanka ah.[6]

---

[4] https://journals.sagepub.com/doi/pdf/10.2190/HS.41.2.c
[5] https://www.oregon.gov/oha/PH/ABOUT/Documents/sha/state-health-assessment-full-report.pdf
[6] Warbixinta OHA ee toddobaadlaha ah ee COVID-19, Sitembar 29, 2021. https://www.oregon.gov/oha/covid19/Documents/DataReports/Weekly-Data-COVID-19-Report.pdf

Maalgelinta xaqsoorka caafimaadka ee sharcigu u baahan yahay

Bishii Luulyo 2021, Golaha Shacr-dejinta ee Oregon wuxuu meel-mariyay HB 3353 (eeg Lifaaqa A), oo u baahan in CCO-yada ay:

- ugu yaraan 3% miisaaniyaddooda guud ku kharash gareeyaan barnaamijyada iyo adeegyada sare u-qaadayo xaqsoorka caafimaadka, *iyo*
- ay noqdaan kuwa ay la xisaabtami karto bulshada.

Si loo taageero ujeeddada amarkani, sida ku cad dib-u-cusboonaysiinta ka tanaasulida tijaabada ee 1115(a), OHA waxay soo jeedin doontaa in CCO-yada u qoondeeyaan ugu yaraan 1/3 lacagahan (ugu yaraan 33% ee 3%) in ay si toos ah u maamulaan iskaashatooyinka maalgalinta bulshada ee cusub. Waxaa muhiim ah in abuurista soo-jeedintan ay qayb ka ahaayeen Isbahaysiyada Xaqsoorka Caafimaadka Goboleed ee Oregon (RHEC-yada) iyadoo loo marayo hannaan gaar ah oo ay bulshadu hogaaminayso, sida hoos lagu sharaxay. Intaas waxaa dheer, sharcigu wuxuu OHA uga baahan yahay inay raadsato oggolaanshaha CMS oo ah in 3% miisaaniyadda guud ee CCO ee ku saleysan qiimaha la geliyo wanaajinta xaqsoor la'aanta caafimaadka, iyo in kharashka noocaa ah loo tixgeliyo inuu ka mid yahay kharashyada wanaajinta caafimaadka iyo tayada iyadoo ujeedadu tahay sicir dejinta (wixii dheeraad ah, fadlan eeg warqadda fikradda *Miisaaniyadda Guud ee ku saleysan Qiimaha*).

Codka bulshada ku leedahay go'aan gaarista CCO

Qayb muhiim ah oo ka tirsan qaabka/modheelka CCO ee Oregon ayaa waxay ahayd in codka bulshada lagu daro go'aan gaarista CCO, taasoo gobolka Oregon rajaynayo inuu sii ballaariyo iyadoo la adeegsanayo iskaashiyo ay hoggaaminayso bulshada kuwaasoo diiradda saari doona dadka iyo bulshooyinka ay sida aadka ah u waxyeelleeyeen caddaalad darrooyinka taariikhiga ah iyo kuwa casriga ah iyo xaqsoor la'aanta caafimaadka.

> *"Yaa fiican inay sheegaan waxa looga baahan yahay bulshada oo aan ka aheyn* ***bulshada?"***
>
> *-Ray'iga bulshada ee Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee OHA*

Isbahaysiyada goboleed ee xaqsoorka caafimaadka

Sannadkii 2011, RHEC-yada ayaa OHA ula yimaaday soo-jeedin ku aadan dib-u-cusboonaysiinta ka tanaasulida tijaabada ee 1115(a), kadibna waxay si khaas ah ula shaqeeyeen golaha sharci-dejinta Oregon si ay gacan uga geystaan naqshadda HB 3353. Intaas kadib, hoggaanka OHA iyo RHEC ayaa si khaas ah uga wada shaqeeyay in la dhiso ujeeddada HB 3353 iyo in la kordhiyo la xisaabtanka bulsheed iyadoo la xoojinayo doorka bulshada ay ku leedahay aqoonsiga xaqsoor la'aanta iyo gaarista go'aano maalgashi si wax looga qabto xaqsoor la'aanta.

RHEC-yada, oo gaara in ku dhow 300-500 urur, ayaa hoggaamiyeyaal ka in awood la siiyo kooxo kala duwan si ay ugu lug yeeshaan samaynta xalal gaar ah, la jaanqaadayo dhaqanka bulshada oona waara oo wax looga qabanayo arrimaha baahsan ee xaqsoor la'aanta ee saameeya caafimaadka iyo fayo-qabka dadka Oregon. Qayb muhiim ah oo ka mid ah shaqadooda ayaa ah in bulshooyinka kala duwan laga caawiyo dhisida awoodooda ah inay la shaqeeyaan go'aan-gaarayaasha, CCO-yada, iyo nidaamyada kale ee caafimaadka si wax looga qabto xaqsoor la'aanta nidaamsan iyadoo la adeegsanayo isbeddel lagu sameeyo siyaasada, nidaamka iyo bay'ada caqabada ku ah in bulshooyinka ay si buuxda u gaaraan awoodooda caafimaad.

Koox-hawleedka OHA/RHEC waxay kulmeen 12 jeer intii u dhaxaysay Maayo iyo Luulyo 2021 si loo sameeyo istaraatijiyado lagu sameynayo moodheelo loogu talagalay sidii awoodda iyo khayraadyada loogu wareejin lahaa bulshada. Maadaama la aqoonsaday in geeddi-socodku noqon karo mid leh muhiim la mid ah mida natiijada,

shaqadu waxaa ka mid ahaa dhisida xiriir iyo kalsooni, gaar ahaan in la kordhiyo kalsoonida ay isku qabaan ururada bulshada iyo dawladda, magacaabida qaar ka mid ah qiyamyada aan leenahay marka aan si wadajir ah u qabanayno shaqada iyadoo loo marayo sameynta heshiisyo kooxeed, wadaagga baahiyada si loogu guuleysto in si wada jir ah loo dhammaystira shaqada, caddeynta doorarka iyo baaxadda shaqada, iyo ku heshiinta mabaadi'da hagayso shaqada si loo xaqiijiyo in moodheelku loo naqshadeeyay in lagu gaaro yoolalka xaqsoorka caafimaadka, oo ay ku jirto maalgelinta bulshooyinka leh jinsiyada duwan, dhaqanka duwan, iyo kuwa aan si fiican loogu adeegin.

Golayaasha latalinta bulshada

Tan iyo sanadii 2012, qaynuunku wuxuu CCO kasta uga baahnaa inay abuuraan oo ay hawlgeliyaan golaha latalinta bulshada (CAC) si ay u kormeeraan qiimeynta caafimaadka bulshada (CHA) ee CCO iyo qorshaha wanaajinta caafimaadka bulshada (CHP) iyo si ay u hubiyaan in wax laga qabto baahiyada daryeelka caafimaad ee macaamiisha iyo bulshada. Ugu yaraan kala bar xubnaha CAC kasta waa inay noqdaan xubno ka tirsan CCO.

CCOs waxaa sidoo kale lagu dhiirrigeliyaa inay dhaqaale ahaan la shuraakoobaan ururada maxalliga ah, kuwa gaarka u ah dhaqanka bulshada iyo hay'adaha bulshada, sida Isbahaysiga Xaqsoorka Caafimaadka Goboleed ee Oregon (RHEC-yada) (eeg Lifaaqa A). Sida ku cad soo iibsigeeda CCO ee ugu dambeeyay, Oregon waxay qaaday tillaabooyin lagu xoojinayo doorarka latalinta ee CAC-yada laguna kordhinayo matalaadda iyo kala duwanaanshaha ay bulshada ku leedahay CAC-yada. Si kastaba ha ahaatee, CAC-yada ayaa weli ah guddiyo lataliyo CCO-yada, oo leh saameyn kala duwan ku leh go'aan-gaarista.

Iskaashatooyinka maalgalinta bulshada

Haatan, Oregon waxay codsan doontaa maalgelin federaal oo ku aaddan iskaashatooyinka ay hoggaamiso bulshada kuwaasoo hagayo maalgelinta xaqsoorka caafimaadka. Oregon waxay horey u dhistay aasaas si ay u taageerto istaraatiijiyadan: HB 3353 waxaa loogu talagalay in bulshooyinka awood loo siiyo inay qayb ka mid ah lacagaha Medicaid ku aadiyaan wax ka qabashada daryeelka caafimaadka iyo arrimaha bulsheed ee inta badan gacan ka geysto xaqsoor la'aanta caafimaadka.

Iyadoo la raacayo sharcigan, gobolka Oregon, oo si dhow ula shaqeynayo RHEC-yada bulshada, ayaa qorsheysay barnaamij tijaabo ah si loo abuuro loona helo iskaashatooyinka maalgalinta bulshada oo cusub (CIC-yada). Iskaashatooyinkan ay hoggaaminayso bulshada ayaa diiradda saari doona dadka iyo bulshooyinka ay waxyeellada ugu badan ka soo gaartay caddaalad-darrooyinka taariikhiga ah iyo kuwa hadda jira, oo ay ku jiraan balse aan ku koobneyn sagaalka Qabiil iyo bulshooyinka Qabiil ee uu aqoonsan yahay gobolka Oregon; Latino/a/x, Madowga/Afrikaanka Maraykanka ah, Aasiyaanka, Reer Jasiirada Baasifik, iyo Hindida Maraykanka/Dadka Dhaladka Alaska, iyo bulshooyinka kale ee midabka leh; dadka naafada ah; dadka aqoontooda Ingiriisiga ay xadidan tahay; iyo bulshooyinka soo-galootiga iyo qaxootiga.

Inkastoo wax ka qabashada sababaha aasaasiga ah ee xaqsoor la'aanta caafimaadka ee ka dhashay sarraynta dadka caddaanka ah ay tahay hawl ku cusub nidaamka daryeelka caafimaadka, RHEC-yada iyo ururada bulsheed (CBO-yada), oo ay ku jiraan ururada adeegga bulshada iyo ururada gaarka u ah dhaqanka bulshada, ayaa in muddo dheer ahba yaraynayay xaqsoor la'aanta oo wax ka qabanayay waxyaabaha kusaabsan bulshada ee gacanta ka geysto go'aaminta caafimaadka bulshada. Inta CCO-yadu sii wadaan inay ballaariyaan

shaqadooda si ay wax uga qabtaan baahiyada bulsheed ee xubnaha OHP, xaqsoorka caafimaadka iyo waxyaabaha kusaabsan bulshada ee gacanta ka geysto go'aaminta caafimaadka bulshada, waxaa muhiim ah in Oregon ay taageerto CBO-yada taariikh ahaan aan si fiican loogu adeegin maadaama ay shuraako adag iyo hoggaamiyeyaal ka yihiin dadaalkaa.

Kaydadka Federaalka

Oregon waxay ka shaqaynaysay inay xadido kharashyada daryeelka caafimaadka ee Medicaid iyo suuqyada kaleba. Sida ku cad dib-u-cusbooneysiinteeda tijaabada ee 2012 iyo 2017, gobolka Oregon waxaa ka go'an in heerka kobaca kharashka Medicaid ee ku baxa xubin kasta bishiiba (PMPM) ay yareyso laba boqolkiiba marka loo eego celceliska qaran ee la saadaaliyay ee 5.4% ilaa 3.4%. Illaa iyo hadda, Oregon waxay ku guulaysatay inay gaarto yoolkan, isla markaana xadidista kharashyada ayaa weli ah mudnaanta koowaad ee gobolka. Oregon waxay gaartay yoolkan iyadoo u maraysa moodhelkeeda cusub ee dib-u-habaynta nidaamka caafimaadka, CCO-yada, kuwaasoo lagu dhiirrigeliyay inay joogteeyaan bixinta daryeel tayo sare leh iyagoo yareynayo heerka kobaca qiimaha.

Sannadka 2021, Oregon waxay ballaarisay moodheelkan, iyadoo yool loogu talagalay kobaca kharashka daryeelka lagu dabaqayo dhammaan suuqyada gobolka oo dhan. Yoolkani wuxuu kobaca kharashka daryeelka caafimaad ee qofkiiba ee gobolka oo dhan ka dhigayaa 3.4% muddada udhaxayso 2021-2025 iyo 3.0% muddada udhaxayso 2026-2030. Gobolka Oregon wuxuu keydin weyn ka filayaa suuqyada oo dhan. Gobolka Oregon wuxuu keydisan karaa $19 bilyan oo ah lacagta ku baxdo Medicaid, Medicare, iyo kharashyada daryeelka caafimaad ee ganacsi 7-da sano ee soo socota, sida ku cad Jantuuska 1-aad.

Marka hoos loo dhigo kharashaadka ku baxayo qorshayaasha caafimaad ee u qalma, barnaamijkan kobca kharashka daryeelka caafimaad ee la joogteyn karo wuxuu yareyn karaa lacagaha qaadayaasha ganacsi, oo ay ku jiraan kuwa Suuqa, taasoo horseedaysa kayd federaal oo dheeraad ah oo ka yimaado Dhibcaha Canshuurta Lacageed ee Hormariska ah.

Ugu dambayntii, gobolka Oregon wuxuu leeyahay tiro aad u badan oo ah dadka iska diiwaangelinaya qorshayaasha Medicare Advantage ee Medicare – isdiiwaangelinta gudaha Oregon waa 47% halka mida qaran ay tahay 38%. Maadaama xadka cusub ee kharashaadka uu quseeya dhammaan suuqyada, dowladda federaalku waxay filan kartaa inay aragto kaydyo dheeraad ah oo ka soo gala qorshayaasha Medicare Advantage.

Jaantuuska 1-aad

Yoolka Kobaca Kharashka ee gobolka Oregon wuxuu keydin karaa $19 bilyan oo ah lacagta ku baxdo Medicaid, Medicare, iyo kharashyada ganacsi ee daryeelka caafimaad 7 sano ee soo socota.[7]

Tirooyinka doolarku waa balaayiin

[7] Xigashada xogta: Kharashyada Daryeelka Caafimaadka Qaranka ee CMS



Kharashka hadda la saadaaliyay, iyadoo aysan ku jirin yoolka kobaca kharashka, ee suuqyada **ganacsi** (uu ku jira Suuqa), **Medicare**, iyo **Medicaid**.

Xariiqa madow wuxuu tilmaamayaa kobaca la saadaaliyay oo wato yoolka kobaca kharashka.

Istaraatijiyadaha la soojeediyay

Si Oregon u bilawdo inay saxdo caddaalad darrooyinka taariikhiga ah iyo kuwa hadda jira ee asalka u ah xaqsoor la'aanta caafimaadka, waa inaan samayno maalgelinno cusub oo diiradda lagu saaray waxyaabo ka baxsan xarumaha daryeelka caafimaadka. Maalgalinadani waa inay sidoo kale beddelaan awoodda go'aan qaadashada iyo kheyraadyada si ay maalgelintaas ugu hagaan bulshooyinka ay sida weyn u waxyeeleeyeen caddaalad-darrooyinka bulsheed.

Iyadoo la kaashanayo CMS, gobolka Oregon wuxuu kordhin karaa maalgalinta xaqsoorka caafimaadka wuxuuna taageeri karaa moodheelo xooggan oo ku saabsan maamulka bulshada oo la hirgelinayo gobolka oo dhan. Gobolka Oregon wuxuu filayaa in maalgalinadani ay wanaajin doonaan waxyaabaha gacan ka geysto go'aaminta caafimaadka bulsheed, taasoo wanaajin doonta natiijooyinka caafimaad ee dadka ay sida weyn u waxyeelleeyeen cunsuriyada nidaamsan iyo caddaalad-darrada bulsheed, iyo in sidoo kale ay kordhin doonta kaydka kharash ee dawladda gobolka iyo federaalka.

Gobolka Oregon wuxuu codsanayaa maalgalin federaal oo cusub oo diiradda lagu saarayo wanaajinta xaqsoorka caafimaadka, oo ay ku jirto
maalgelin lagu:

1. dhisayo kaabayaal lagu taageerayo hawlaha wax looga qabanayo xaqsoorka caafimaadka
2. taageerayo hawlaha wax looga qabanayo xaqsoorka caafimaadka ee ay bulshadu hoggaamiso iyo dadaallada gobolka oo dhan
3. siinayo iskaashatooyinka ay bulshadu hogaamiso dhaqaale ay ku maalgeliyaan xaqsoorka caafimaadka.

Si loo hirgeliyo maalgalintan federaaliga ah, Oregon waxay codsanaysaa awoodaha kharash-gareynta ee soo socda:

a. Awoodda kharashaadka ee lagu yareynayo kharashka federaal ee ku baxa Medicaid si wax looga qabto Waxyaabaha Kusaabsan Bulshada ee Gacan Ka Geysto Caafimaadka (SDOH) ee xubnaha OHP ee la

tacaalayo isbeddel nololeed ama carqalado sida lagu sharraxay *Wanaajinta Natiijooyinka Caafimaadka iyadoo la Nidaaminayo Kala-guurka Nolosha Iyo Caymiska* ee warqadda cilmi-baarista.

b. Awoodda saamaxayso in maalgelinta CCO ee xaqsoorka caafimaadka ee uu u baahan yahay HB 3353 iyo sida lagu qeexay *Wanaajinta Natiijooyinka Caafimaadka iyadoo la Nidaaminayo Kala-guurka Nolosha Iyo Caymiska ee ku jirta warqadda cilmi-baarista* si loo tixgeliyo inay tahay sheegashooyin caafimaad ama kharashaadka wanaajinta tayada iyadoo ujeeddooyinka yihiin dejinta sicirka CCO.

1. Maalgelinta federaalka geli kaabayaal dhaqaalaha lagu taageerayo hawlaha wax looga qabanayo xaqsoorka caafimaadka

a. Dhis kartida maalgelinada loogu talagalay xaqsoorka caafimaadka ee bulshadu hoggaamiso

Gobolka Oregon wuxuu codsanayaa maalgelin federaal oo lagu taageerayo dhisidda awoodda iskaashatooyinka maalgalinta bulshada (CIC-yada) isla markaana kor loogu qaadayo awoodda ay u leeyihiin inay hagaan oo ay maamulaan maalgalinno baaxad waaweyn.

In kasta oo gobolka Oregon ka filayo CIC-yada inay ka faaiideystaan ururada iyo dadaallada haddeer ka jira bulshooyin badan, xaqiiqadu waxay tahay in CBO-yada si liidato loo maalgeliyo marka la barbardhigo ururada daryeelka caafimaadka. Gobolada iyo bulshooyinka kale ayaa waxay arkeen inay lama huraan tahay in CBO-yada la siiyo maalgelin iyo khayraadyo loogu talagalay dhisidda awoodda si ay shuraako ula noqdaan ururada daryeelka caafimaadka.[9]

> *"Dadka hayo shaqada in muddo ahna soo waday shaqada…* ***Looma baahna qorshe cusub oo istaraatiijiyadeed.*** *Waxaan u maleynayaa inay tahay in qof walba oo horay ay ugu socdeen qorsheyaal ee leh, "Hagaag, sidee ayaan kor ugu qaadi karnaa dhammaan dadkii howsha waday?"* ***Waxaan u maleynayaa in shaqada OHA ay qaban karto hay'ad ahaan ay tahay u-doodista ururada haatan howsha wada.****"*
>
> *-Ray'iga bulshada ee Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee OHA*

b. Khayraadyo geli kaabayaasha gobolka oo dhan si loo taageero maalgalinta xaqsoorka caafimaadka ee ay bulshadu hoggaamiso

In maalgalinta federaalka la geliyo CIC-yada ka sokow, gobolka Oregon wuxuu codsanayaa miisaaniyad federaal oo loogu talagalay kaabayaasha gobolka oo dhan si loo taageero barnaamijka CIC iyo guud ahaan isgaarsiinta udhaxayso qaybaha kala duwan. Maalgelinta federaalka ee loogu talagalay CIC-yada waxaa ku jiri kara, tusaale ahaan, kaalmo farsamo oo lagu taageerayo geedi-socodka deeqda CIC ama taageeridda wada shaqaynta dhammaan CIC-yada qabanayo hawlo isku mid ah. In kasta oo CIC-yadu isku dubaridaan waxqabadyada maxalliga ah, waxaa sidoo kale jiri doona baahi loo qabo nidaamyo ka

[9] Ka-tanaasulaadyada tijaabada ee 1115(a) ee dhowaan ka dhacay dhowr gobol oo kale, sida North Carolina iyo Massachusetts, ayaa waxaa ka mid ahaa maalgelinta dhisida awood/kaabayaal loogu talagalay ururada bulsheed iyo/ama adeegyada bulshada ee la shuraakoobay daryeelka caafimaadka. Daraasad tusaale ah oo ku saabsan ururada bulsheed ee ka qaybgalaya barnaamijka DSRIP ee New York ayaa lagu aqoonsaday in "dhisidda awoodda" ay tahay wax loo baahan yahay si loo simo CBO-yada iyo ururada daryeelka caafimaadka. *Eeg* Helida Xaqsoorka Caafimaadka iyo Fayo-qabka Dadka Ku jira Medicaid: Daraasad Tusaale ah oo ku Saabsan Ku Lug Lahaanshaha Urur Bulsheed (CBO) ee Barnaamijka Bixinta Lacagta Dhiirrigelinta ah ee Dib-u-habaynta Nidaamka Gaarsiinta (DSRIP), https://academyhealth.org/sites/default/files/achieving_health_equity_medicaid_cbos_april2019.pdf

jira gobolka oo dhan oo bulshooyinka ka caawinayo wax ka qabashada xaqsoor la'aanta caafimaad ee ka baxsan barnaamijka CIC.

2. Maalgalinta federaalka geli hawlaha wax looga qabanayo xaqsoorka caafimaadka ee ay hoggaamiso bulshada iyo dadaallada laga qabanayo gobolka oo dhan

a. Maalgelinta CCO-yada ee lacagaha ay bulshadu maamusho waa in loo tixgeliyaa inay tahay kharashyada caafimaadka iyo wanaajinta tayada

Marka CIC-yadu ay sameystaan kaabayaal ku filan oo u saamaxayo inay qaadaan mas'uuliyadda maaliyadeed, waxay maamuli doonaan lacagaha CCO-yada ee bulshada (sida ku cad HB 3353). Sida lagu sheegay warqadda fikradda ee *Miisaaniyadda Guud ee Ku Salaysan Qiimaha* , CCO-yada Oregon waxay haatan miisaaniyaddooda u saamixi kartaa inay kharash-gareeyaan xaqsoorka caafimaadka iyo waxyaabaha gacanta ka geysto go'aaminta caafimaadka bulshada, oo ay ku jiraan adeegsiga adeegyada caafimaadka la xiriira (HRS) iyo Taageeridda Caafimaadka Dhammaan Dadka iyadoo loo marayo Dib U-maalgelinta: Hindisaha SHARE.[10] Si kastaba ha ahaatee, qarashka ku baxa HRS ayaa weli hooseeya (0.7% celcelis ahaan), marka la eego saamaynta suurtagalka ah ee maalgelinta baahiyaha bulsheed ee la xiriira caafimaadka ay ku yeelan karto natiijooyinka caafimaadka. Sida ku xusan araarka, HB 3353 wuxuu uga baahan tahay OHA inay CMS ka raadsato oggolaansho ah in 3% miisaaniyadda guud ee ku saleysan qiimaha ee CCO la geliyo xaqsoor la'aanta caafimaadka loona tixgeliyo inay tahay kharashyada caafimaadka iyo wanaajinta tayada.

3. Sii iskaashatooyinka ay bulshadu hogaamiso khayraadyo ay ku maalgeliyaan xaqsoorka caafimaadka

a. Gobolka Oregon wuxuu codsanayaa maalgelin federaal oo dheeraad ah oo lagu taageerayo deeqaha maalgalinta xaqsoorka caafimaadka (HEI)—lacagaha waa in si toos ah loogu aadiyaa CIC-yada iyadoo loo marayo geedi-socod ay maamusho dowladda gobolka.

Fikrad ahaan, geedi-socodka deeqda ma noqon doono mid tartan ah, wuxuuna ku koobnaanayaa tiro yar oo abaalmarino ah, ama wuxuu noqonayaa mid qeexayo mowduucyada wax laga qabanayo. Deeqaha HEI waxay u oggolaan doontaa CIC-yada u-qalma inay maalgelin dheeraad ah ku sameeyaan wax ka qabashada xaqsoor la'aanta caafimaadka ee saameyneysa xubnaha Medicaid ee deegaanka iyo qoysaskooda.

Soo-jeedinada deeqda HEI ayaa tilmaami doona dadka loo adeegayo iyo maalgalinada la qorsheeyey, kuwani oo labaduba ay tahay in marka hore lagu saleeyo caddaymaha ku salaysan bulshada ee la heli karo iyo sidoo kale qiimeynta caafimaadka bulshada deegaanka / qorshayaasha wanaajinta caafimaadka

---

[10] Hindisaha SHARE wuxuu ka imanayaa shardi sharciyeed oo sheegayo in ururada daryeelka isku-duwan ay qaar ka mid ah lacagaha faa''idada u ah ku celiyaan bulshooyinkooda. Kadib markay buuxiyaan miqyaasyada maaliyadeed ee ugu yar, CCO-yada waa inay qayb ka mid ah dakhligooda soo hara canshuurta kadib ama kaydkooda ku bixiyaan adeegyo wax ka qabanayo xaqsoor la'aanta caafimaadka iyo waxyaabaha gacanta ka geysto go'aaminta caafimaadka bulshada iyo xaqsoorka. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo https://www.oregon.gov/oha/HPA/dsi-tc/Pages/SHARE.aspx

bulshada.[11] Tusaalooyinka HEI-yada la soojeediyay waxaa ka mid noqon kara ballaarinta helida taageerooyinka iyo adeegyada guryaha; hormarinta goobaha cagaaran iyo wanaajinta degaanada la dhisay; kordhinta helida taageerooyinka caafimaadka bulsheed iyo caafimaadka maskaxeed; burburinta cunsuriyadda qaabdhismeedka ah, sida dadaallada lagu ballaarinayo shaqaale dhaqan ahaan iyo luqad ahaan fahmayo bulshada; iyo/ama xanaanada carruurta oo la awoodi karo. Waxaa intaas dheer, iyadoo ku xiran baahiyada bulshada, HEI-yada waxay diirada saari karaan wax u qabashada dad gaar ah, sida carruurta iyo qoysaskooda, gaar ahaan kuwa ka tirsan dadka mudnaanta la siinayo. Marka CIC-yada loo oggolaado inay maalgeliyaan noocyada kala duwan ee taageero oo ay ogyihiin inay yihiin kuwa mudnaanta ugu sareysa leh, deeqda HEI waxay abuuri doontaa waxqabad bulsheed iyo adkeysi. (Eeg Lifaaqa A si aad u hesho faahfaahin ku saabsan HB 3353, CIC-yada iyo deeqaha HEI.)

Moodheelka la soojeediyay ee Oregon wuxuu sameeynayaa Iskaashatooyinka Maalgalinta Bulshada si looga faa'iidaysto ilo badan oo maaliyadeed.*



*Maalgelinta gobolka iyo CCO-yada ka sokow, Iskaashatooyinka Maalgalinta ee Bulshada ay Hoggaamiso ee gobolka ayaa ka faa'iideysan kara maalgelinada nidaamyada caafimaadka ee kale, sida maalgelinta dheefta bulshada ee isbitaalka, iyo samafalka maalgelinta xaqsoorka caafimaadka ee bulshooyinka.

c. Maalgeli hindisayaasha xaqsoorka caafimaadka ee gobolka oo dhan

Maalgelinta waxqabadyada ay bulshadu hoggaaminayso ka sokow, gobolka Oregon wuxuu codsanayaa maalgelin la geliyo gobolka oo dhan, dadaallo ballaaran oo wax looga qabanayo xaqsoorka caafimaadka. Tusaale ahaan, sida lagu falanqeeyay *Wanaajinta Natiijooyinka Caafimaadka iyadoo la Nidaaminayo Kala-guurka Nolosha Iyo Caymiska* ee ku jirta warqadda cilmi-baarista, gobolka Oregon wuxuu raadinayaa maalgelin federaal si wax looga beddelo OHP si loo taageero xubnaha marka ay jiraan carqaladooyin quseeyo caymiska iyo isbeddelada nolosha. Hadafku waa in wax laga qabto dulduleelada ka jira caymiska Medicaid; in la kordhiyo caymiska waqti xaddidan; iyo in la bixiyo adeegyo taageero oo qeexan inta lagu jiro xilliyada isbeddelka (tus., marka cunugu dhaafo da'da daryeelka korinta) ama

[11] Oo ay ku jiraan xogta tayo iyo mida tiro sida xogta jinsiyada, qowmiyadda, luqadda, naafanimada, qaabka galmada, aqoonsiga jinsiga iyo xogta kale ee dadka ee laga helay tirakoobka; iyo sidoo kale xog laga helay qiimeynta ku saabsan baahiyada ee ay bulshadu bilowday ee sharxaya baahiyada bulshada ee haatan jira iyo kuwa soo baxaya.

xilliyada ay jiraan dhacdooyinka cimilada ee carqaladeynta leh (tus., dab-duureedka, kulaylka). Maadaama dadka reer Oregon ee wajahayo isbeddelada laga hadlayo ay inta badan yihiin dadka iyo bulshooyinka ay sida aadka ah u waxyeelleeyeen caddaalad-darrada taariikhiga ah iyo mida haddeer jirta iyo xaqsoor la'aanta caafimaadka, dadaalladan ayaa muhiim u noqon doona horumarinta xaqsoorka caafimaadka ee gobolka.

Waxa siyaasadahani uga dhigan yhiin xubnaha OHP

Xubnaha OHP ee la kulmay cadaalad-darro taariikhi ah iyo mid haddeer jirta ayaa ka qaybqaadan doona naqshadaynta—ama ururada kale ee bulshada ku salaysan iyo u-doodayaasha ayay u wakiilan doonaan naqshadeeynta—geeddi-socod lagu dhisayo Iskaashatooyinka Maalgalinta Bulshada ee gobolka.

Ujeeddada fikraddan ayaa ah in xubnaha OHP iyo xubnaha kale ee dadweynaha ee ka soo jeeda kooxaha ay sida xun u waxyeelleeyeen caddaalad-darrooyinka taariikhiga ah iyo kuwa haddeer jiraba ay la kulmi doonaan caafimaad tayo leh oo ka dhasha waxqabadyada xaqsoorka caafimaadka ee ay hoggaaminayso bulshada. Fikradani waxay dhaafsan tahay fikirka kaqeybgalka bulshada waxayna ku aadan tahay in bulshada ku lug lahaato go'aan-qaadashada ku saabsan maalgelinta khayraadyada. Hadafku waa in awood la siiyo bulshada, in caafimaadka xubnaha bulshada la wanaajiyo iyo ugu dambayntii in la baabi'iyo xaqsoor la'aanta caafimaadka.

Lifaaqa A

Oregon House Bill 3353 (2021)

Sameynta isbeddel macno leh waxay u baahan tahay in ka badan sare u-qaadista go'aan-qaadashada bulshada iyo jihada moodheelka CCO – waxay sidoo kale u baahan tahay dhisidda fikradaha si toos ah uga *yimid* bulshooyinka iyo in si toos ah iskaashi loola *yeesho* bulshooyinka aan taariikh ahaan si fiican loogu adeegin si loo dhiso moodheel cusub. Tani awgeed, istaraatijiyadaha asalka u ah sharciga dib-u-cusboonaysiinta ka-tanaasulida tijaabada ee 1115(a) ee Oregon ayaa waxaa la abuuray iyadoo loo marayo geedi-socod khaas ah oo ay bulshadu hogaamineyso.

Taariiqda

Waqti xaadirkan lix RHEC-yo ayaa u adeego 11 degmooyin oo ka mid ah 36-da degmo ee Oregon iyo Qabaa'illada Midoobay ee Warm Springs. Sannadka 2021, golaha sharci-dejinta ee Oregon wuxuu meel-mariyay sharciga Senate Bill 70 kaasoo kheyraad siin doona afar RHEC-yo oo dheeraad ah, iyadoo hadafku yahay in gobolka oo dhan la gaaro sannadaha soo socda.

Bishii Luulyo 2011, OHA waxay aasaastay hindisaha Isbahaysiga Xaqsoorka Caafimaadka ee Gobolka (RHEC). RHEC-yada ayaa hoggaamiyeyaal ka in awood la siiyo kooxo kala duwan si ay ugu lug yeeshaan samaynta xalal gaar ah, la jaanqaadayo dhaqanka bulshada oona waara oo wax looga qabanayo arrimaha baahsan ee xaqsoor la'aanta ee saameeya caafimaadka iyo fayo-qabka dadka Oregon. RHEC-yada waxay ka shaqeeyaan inay aqoonsadaan arrimaha ku saabsan xaqsoorka caafimaadka ee ugu daran ee gobolka ka jira waxayna raadiyaan xalal hal abuur leh si wax looga qabto sababaha aasaasiga ah ee caqabadaha ku ah caafimaadka iyo fayo-qabka iyadoo loo marayo isbeddelo lagu sameeyo siyaasadaha, nidaamyada iyo bay'adaha. Qayb muhiim ah oo ka mid ah shaqadooda ayaa ah in bulshooyinka jinsiyad ahaan iyo qowmiyado ahaan kala duwan laga caawiyo dhisida awoodooda ah inay la shaqeeyaan go'aan-gaarayaasha, CCO-yada, iyo nidaamyada kale ee caafimaadka si wax looga qabto xaqsoor la'aanta nidaamsan iyadoo la adeegsanayo isbeddel lagu sameeyo siyaasada, nidaamyada iyo bay'adaha iyo si loo yareeyo waxyaabaha caqabada ku ah in shakhsiyaadka iyo qoysaskooda ay si buuxda u gaaraan awoodooda caafimaad.

RHEC-yada ayaa OHA ula yimaaday soo-jeedin ku aadan dib-u-cusboonaysiinta ka tanaasulida tijaabada ee 1115(a) waxayna si khaas ah ula shaqeeyeen golaha sharci-dejinta si ay gacan uga geystaan naqshadda HB 3353. Intaas kadib, hoggaamiyeyaasha OHA iyo RHEC ayaa sameeyay koox-hawleedka Maaliyada ay Bulshada Maareyso si loo dhiso ujeeddada HB 3353, si sal loogu yeelo nuxurka habboon ee dib-u-cusboonaysiinta ka-tanaasulida tijaabada ee 1115(a) iyo si loo kordhiyo la-xisaabtanka ay sameynayaan bulshooyinka taariikh ahaan dulman iyadoo xoogga la saarayo doorka bulshada ay ku leedahay aqoonsashada xaqsoor la'aanta iyo qaadashada go'aano maalgalin si wax looga qabto xaqsoor la'aanta.[12]

[12] Koox-hawleedka OHA/RHEC ee Maaliyada ay Bulshada Maareyso waxay kulmeen 12 jeer intii u dhaxaysay Maayo iyo Luulyo si loo sameeyo istaraatijiyado lagu sameynayo moodheelo loogu talagalay sidii awoodda iyo khayraadyada loogu wareejin lahaa bulshada. Maadaama la aqoonsaday in geeddi-socodku noqon karo mid leh muhiim la mid ah mida natiijada, shaqadu waxaa ka mid ahaa dhisida xiriir iyo kalsooni, gaar ahaan in la kordhiyo kalsoonida ay isku qabaan ururada bulshada iyo dawladda, magacaabida qaar ka mid ah

HB 3353

Sida lagu sheegay *Miisaaniyadda Guud ee Ku Salaysan Qiimaha* ee warqadda fikradda, CCO-yada Oregon waxay haatan miisaaniyaddooda u saamixi kartaa inay kharash-gareeyaan xaqsoorka caafimaadka iyo waxyaabaha gacanta ka geysto go'aaminta caafimaadka bulshada, oo ay ku jiraan adeegsiga adeegyada caafimaadka la xiriira (HRS) iyo Hindisaha SHARE.[13] Si kastaba ha ahaatee, qarashka ku baxa HRS ayaa weli hooseeya (0.7% celcelis ahaan), marka la eego saamaynta suurtagalka ah ee maalgelinta baahiyaha bulsheed ee la xiriira caafimaadka ay ku yeelan karto natiijooyinka caafimaadka. Sharciga wuxuu uga baahan tahay OHA inay CMS ka raadsato oggolaansho ah in 3% miisaaniyadda guud ee ku saleysan qiimaha ee CCO la geliyo xaqsoor la'aanta caafimaadka loona tixgeliyo inay tahay kharashyada caafimaadka.

Laga soo bilaabo 2020, RHEC-yada Oregon waxay iskaashi la sameyeen CCO-yada iyo golaha sharci-dejinta si loo sameeyo HB 3353, oo ah sharci la meel mariyay 2021 iyadoo ku dhawaad 90% golaha ay taageereen. Qodobbada muhiimka ah ee sharciga waxaa ka mid ah:

- Ugu yaraan 3% miisaaniyadda guud ee CCO-yada waxaa la gelin doonaa maalgalinta xaqsoorka caafimaadka, waxyaabaha gacanta ka geysto go'aaminta caafimaadka bulshada, iyo shaqaale dhaqan ahaan la jaanqaadayo bulshada iyadoo diiradda la saarayo dadka mudnaanta la siinayo oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobneyn, sagaalka qabiil ee Oregon ee federaal ahaan la aqoonsan yahay iyo bulshooyinka Qabiilka ; Latino/a/x, Madowga/Afrikaanka Maraykanka ah, Aasiyaanka, Reer Jasiirada Baasifik, iyo Hindida Maraykanka/bulshooyinka ah Dhaladka Alaska iyo bulshooyinka kale ee midabka leh; dadka naafada ah; dadka aqoontooda Ingiriisiga ay xadidan tahay; iyo bulshooyinka soogalootiga iyo qaxootiga.
- Kordhinta la xisaabtanka ay sameynayaan bulshooyinka iyo kormeerka kharashaadka oo ay bulshada hogaaminayso.
- Qaadashada nidaamyada qiimeynta ee adeegsada hababka ku salaysan awooda iyo xogta tayada.

Hirgelinta: Maamulka

Iyadoo lagu saleynayo shuruudaha HB 3353, gobolka Oregon wuxuu soojeedinayaa in la sameeyo qaab-dhismeed kormeer oo laba heer ah oo loogu talagalay maalgelinta xaqsoorka caafimaadka ee CCO:

> **Guddi kormeer heer-gobol ah**, sida uu dhigayo sharciga HB 3353, ayaa waxaa ka koobnaan doona "xubno matalayo kala duwanaanshaha goboleed dadka gobolkan iyadoo lagu salayanayo caddaymo tiro oo uu maamulka ka soo ururisay qaatayaasha kaalmada caafimaadka iyo ugu yaraan hal wakiil oo ka socda sagaalka qabiil ee federaal ahaan la aqoonsan yahay ee gobolkan ama barnaamijyada caafimaadka Hindida ee magaalada."[14] Guddiga kormeerka ee heerka gobol ah ayaa lahaan doona masuuliyada sameynta shuruudo ku aaddan kharashaadka loo baahan yahay in la bixiyo iyo talo ka

---

qiyamyada aan leenahay marka aan si wadajir ah u qabanayno shaqada iyadoo loo marayo sameynta heshiisyo kooxeed, wadaagga baahiyada si loogu guuleysto in si wada jir ah loo dhammaystira shaqada, caddeynta doorarka iyo baaxadda shaqada, iyo ku heshiinta mabaadi'da hagayso shaqada si loo xaqiijiyo in moodheelku loo naqshadeeyay in lagu gaaro yoolalka xaqsoorka caafimaadka, oo ay ku jirto maalgelinta bulshooyinka leh jinsiyada duwan, dhaqanka duwan, iyo kuwa aan si fiican loogu adeegin.

[13] Ibid. Qoraal-hoosaadka 10-aad.
[14] Ibid. Qoraal-hoosaadka 2-aad.

bixinta Codsiga Soojeedinada (RFP) ee Iskaashatooyinka Maalgalinta Bulshada, xallinta khilaafaadka,[15] iyo qiimeynta.

Iskaashatooyinka Maalgalinta Beesha ee Gobolka (CIC-yada) ayaa waxay noqon doonaan hay'ado iskaashi oo ka kooban wakiilo ka socda kooxo kala duwan ee bulshooyinka deegaanka, oo ay ku jiraan shuraakada sida RHEC-yada, CBO-yada dhaqan ahaan u gaarka ah bulshada ee aan lahayn hababka waxyeellada leh ee dhaqanka ugu weyn gobolka, golayaasha caafimaadka ee CCO, ama hay'adaha kale ee bulshada; CCO-yada iyo Golayaasha La-talinta Bulshada; isbitaalada deegaanka; iyo maamulada caafimaadka dadweynaha ee deegaanka. CIC kasta waxay yeelan doontaa hay'ad hoggaan ah, gola bulsheed, iyo maareeyaha maaliyadda/warbixinta. (Hal hay'ad ayaa ciyaari kara doorar badan.)

CIC-yadu waxay noqon doonaan kuwo ay bulshadu hogaaminyeso waxayna ka faa'iideysan doonaan dadaallada bulsheed ee jira, sida RHEC-yada iyo golayaasha caafimaadka ee CCO haddii hay'adahani ay buuxiyaan shuruudaha ay dejiyeen guddiga kormeerka iyo OHA. Si loogu weeciyo awoodda iyo mas'uuliyadda go'aan gaarista si wax-ku-ool leh, gobolka Oregon wuxuu filayaa inuu dejiyo shuruudo dhigayo in hay'adaha hogaanka ah ay matalaan oo ay u adeegaan kooxaha mudnaanta la siinayo[16] ee la kulma xaqsoor la'aanta caafimaad ee ugu weyn. Maadaama wakaaladaha iyo ururada dhaqanada waaweyn ay sii wadi karaan xaqsoor la'aanta iyagoo adeegsanayo caqabadaha qaab-dhismeed ee taariikhiga ah iyo kuwa haddeer jira, waxaa loo tixgelin doonaa inay yihiin shuraako gacan ka geysan kara taageeridda iyo hormarinta yoolalka hay'adaha bulshada, laakiin waa inaan loo tixgelin inay yihiin hay'ad hogaan u ah go'aan qaadashada. Sidaa darteed, CCO-yada waxaa laga filayaa inay shuraako ka noqdaan CIC-yada, laakiin CCO-yada iyo shuraakada nidaamka caafimaadka uma qalmi doonaan inay noqdaan hay'ad hogaan ah. Marka la eego moodheelka RHEC, qaab la mid ah ayaa awood u siiyay RHEC-yada in ay dejiyaan qaabab xaqsoor oo ku aadan maamulka kuwaasoo cod iyo awood dheeraad ah siinayo bulshooyinka jinsiyad ahaan iyo qowmiyado ahaan kala duwan.

CIC-yada waxay dejin doonaan shuruudo-hoosaad loogu talagalay kharashaadka gobolka ee ku aadan xaqsoorka caafimaadka; waxay xaqiijin doonaan in qorshayaasha ay bulshada hogaaminayso laga tixgeliyo shuruudaha iyo go'aanada maalgalinta, oo ay ku jiraan Qorshayaasha Wanaajinta Caafimaadka Bulshada ee ay ansixiyeen CAC-yada; waxayna mas'uul ka noqon doonaan in qayb ka mid ah kharashka ah 3% ee CCO-yada lagu maalgeliyo hindisayaasha xaqsoorka caafimaadka ee bulshooyinka degaankooda.

CIC-yada waxay caadiyan ka koobnaan doonaan CBO-yada iyo ururada bulsheed ee haddeer jira ee maalgalintooda ay aad u liidato marka la barbardhigo ururada daryeelka caafimaadka. CIC-yada waxay u baahan doonaan taageero ku aadan kharashaadka maamulka, sida shaqaalaynta iyo tababbarka shaqaalaha, dhisidda ama kor u qaadida gole bulsho, samaynta heshiisyo bilow ah oo dhex marayo hay'ada hogaanka ah iyo maareeyayaasha maalgelinta/warbixinta, sameynta heshiisyo lala galo CCO-yada, iyo dhisidda kaabayaasha iyo nidaamyada teknolojiyadda macluumaadka ee loo baahan yahay si

[15] Sida ku cad HB 3353, guddiga kormeerka ayaa mas'uul ka ah xallinta khilaafaadka u dhexeeya OHA iyo CCO-yada ee ku saabsan waxa ah kharash bixin habboon.

[16] Dadka mudnaanta la siiyo waxaa ka mid ah laakiin aan kuma xadidno sagaalka qabiil ee Oregon ee federaalku aqoonsan yahay iyo bulshooyinka Qabiilka; Latino/a/x, Madowga/Afrikaanka Maraykanka ah, Aasiyaanka, Reer Jasiirada Baasifik, Hindida Maraykanka/bulshooyinka ah Dhaladka Alaska, iyo bulshooyinka kale ee midabka leh; dadka naafada ah; dadka aqoontooda Ingiriisiga ay xadidan tahay; iyo bulshooyinka soogalootiga iyo qaxootiga.

qaab joogto ah loogu taageero maalgelinta bulshada. Sida horeyba loogu sharaxay warqadan fikradda, CIC-yada waxay heli doonaan fursado ay ku codsadaan maalgelin loogu talagalay dhisidda awoodda. Markay CIC-yadu yeeshaan sal buuxo, waxay sidoo kale u qalmi doonaan maalgelin loogu talagalay kharashaadka maamulka iyo hawlgalka socda, kaalmao farsamo oo ay bixinayso OHA, iyo "Maalgelinta Xaqsoorka Caafimaadka" si ay usii wanaajiyaan xaqsoorka caafimaadka ee bulshadooda.

Hirgelinta: Kharash-gareynta/Bixinta Kharashka

Gobolka Oregon wuxuu qorshaynayaa inuu sameeyo saddex nooc oo ballaadhan oo kharash-garayn ah si loo koobo noocyada kharashaadka lagu tilmaamay HB 3353:

1. **30% ka mid ah 3%** (~1% miisaaniyadda guud ee CCO) ayaa waxaa la gelin doonaa barnaamijyo iyo adeegyo lagu wanaajinayo xaqsoorka caafimaadka ee dadka jinsiyad ahaan, dhaqan ahaan duwan iyo dadka aan si fiican loogu adeegin. Maalgalintan heerka bulshadeed ah waxaa lagu hagaajin doonaa CIC-yada.
2. CCO-yada waxaa looga baahan doonaa inay ugu yaraan **3% ka mid ah 20%** (~0.6% miisaaniyadda guud) u qoondeeyaan **sanduuqa lacagaha adeeg bixiyaha ee kor loo qaaday** ee loogu talagalay caafimaadka habdhaqanka, adeegyada dhaqan ahaan iyo luqad ahaan la jaanqaadayo bulshada, iyo adeeg bixiyayaasha bixiya adeegyada asaagga ku salaysan (sida Shaqaalaha Caafimaad Dhaqameedka).
3. **Lacagta soo haraysa** ee ka mid ah 3% waxay noqon doontaa **mid loo adeegsado in si dabacsan looga jawaabo baahiyada bulshada** waxaana lagu hagaajin karaa mid kasta oo ka mid ah saddexda nooc ee guud ee maalgelinta xaqsoorka caafimaadka: adeegyada gaarka ah ee xubnaha OHP, maalgalinta dheeraadka ah ee heerka bulshadeed, ama lacagaha adeeg bixiyaha ee kor loo qaaday ee dheeraadka ah.

Jaantuska 2-aad:



Hirgelinta: Hawlgallada

Wajiga 1-aad: Guddiga Kormeerka ee Gobolka oo dhan ee uu dhigayo sharciga HB 3353 ayaa sameyn doona shuruudaha CIC wuxuuna OHA kala talin doonaan habka codsiga macluumaadka (RFI) si loo helo macluumaadka ku saabsan hay'adaha bulshada ee damacsan inay iskaashi yeeshaan si ay u abuuraan CIC-yada.

Shuruudaha ayaa qeexi doona:

- Shuruudaha loogu talagalay ururada ka kooban CIC-yada, oo ay u badan tahay inay ka mid ahaan doonaan laakiin aan ku xaddidnayn: iskaashatooyinka Maalgalinta Beesha ee Gobolka (CIC-yada) ayaa waxay noqon doonaan hay'ado iskaashi oo ka kooban wakiilo ka socda kooxo kala duwan ee bulshooyinka deegaanka, oo ay ku jiraan shuraakada sida RHEC-yada, CBO-yada dhaqan ahaan u gaarka ah bulshada ee aan lahayn hababka waxyeellada leh ee dhaqanka ugu weyn gobolka, golayaasha caafimaadka ee CCO, ama hay'adaha kale ee bulshada; CCO-yada iyo Golayaasha La-talinta Bulshada; isbitaalada deegaanka; iyo maamulada caafimaadka dadweynaha ee deegaanka;
- Ururada ay hogaaminayaan CIC waa inay matalaan, u adeegaan kana koobnaadaan dadka mudnaanta la siiyo oo ay ku jiraan, laakin aan ku xadidneyn, sagaalka qabiil ee Oregon ee federaalku aqoonsan yahay iyo bulshooyinka Qabiilka; Latino/a/x, Madowga/Afrikaanka Maraykanka ah, Aasiyaanka, Reer

Jasiirada Baasifik, iyo Hindida Maraykanka/bulshooyinka ah Dhaladka Alaska iyo bulshooyinka kale ee midabka leh; dadka naafada ah; dadka aqoontooda Ingiriisiga ay xadidan tahay; iyo bulshooyinka soogalootiga iyo qaxootiga;

- CIC-yada waa inay awoodaan inay qaadaan mas'uuliyad maaliyadeed (taasoo lagu taageeri doono deeqaha dhisidda awoodda; hoos eeg); iyo
- Qadarka ugu yar ee lacagta ee loo codsan karo deeqaha dhisidda awoodda iyo deeqaha HEI ahaan (eeg hoos).

RFI waxay bixin doontaa macluumaad ku saabsan:

- Hay'adaha bulshada ee raba inay sameeyaan CIC-yada, xuduudahooda juqraafiyeed iyo baaxadda dadka;
- Qaybaha gobolka ee ay CIC-yada matalayaan, oo ay ka mid tahay inay jiraan ugu yaraan mid ka mid ah aagga kasta ee CCO iyo in kale iyo inay jiraan qaar ka mid ah CIC-yada la soojeediyay oo is-dulfuula; iyo
- In OHA ay u baahan tahay inay samayso wacyigelin diirad-saarid leh si ay u taageerto naqshada iyo horumarinta CIC. Tusaale ahaan, haddii RFI muujiso inay jiraan CIC-yo is-dulfuulo, OHA waxay soojeedin kartaa in CIC-yadu ay mideeyaan dadaallada, ama waxay go'aamin kartaa inay CIC-yada is-dulfuula ay habboon yihiin. Taa bedelkeeda, haddii RFI ay muujiso in qaar ka mid ah gobollada CCO aysan lahayn CIC, OHA, iyadoo kaashanayso Guddiga Kormeerka Gobolka oo dhan ee HB 3353, ayaa laga yaabaa inay ku lug yeelato wada-hadallo maxali ah oo lagu taageerayo sameynta CIC.

Wajiga 2-aad: CIC-yada waxay codsan karaan deeq lagu awoodd-dhisid, taasi oo:

- Maalgelin doonta hawlaha maamulka, dhisidda awoodda, iyo kaalmada farsamo ee CIC-yada si ay u dhisaan shabakadahooda CBO iyo sameynta hoggaan gudaha ah;
- Maalgelin doonta Isweydaarsiga Macluumaadka Bulshada ama baahiyada kale ee farsamada si loo fududeeyo isgaarsiinta udhaxayso qaybaha kala duwan; iyo/ama
- Bixin doonta gargaar farsamo iyo kheyraadyo lagu dhisayo kaabayaasha CIC si loo awoodo in la aqbalo lana meel-mariyo maalgelinta CCO, deeqaha Maalgalinta Xaqsoorka Caafimaadka (eeg hoos), iyo maalgelinada suurtagalka ah ee laga yaaba in laga helo ilo kale (tus., faa'iidada bulshada ee isbitaalka, maalgelinta kale ee dawladda, ama samafal).

Wajiga 3-aad: CIC-yada waxay codsan karaan deeqda Maalgalinta Xaqsoorka Caafimaadka (HEI), taasoo ay CIC u adeegsan doonto maalgelinta istaraatiijiyo ay bulshada aqoonsatay si wax looga qabto xaqsoor la'aanta.

Soo-jeedinada deeqda HEI ayaa tilmaami doona dadka loo adeegayo iyo maalgalinada la qorsheeyey, kuwani oo labaduba ay tahay in marka hore lagu saleeyo caddaymaha ku salaysan bulshada ee la heli karo iyo sidoo kale qiimeynta caafimaadka bulshada deegaanka / qorshayaasha wanaajinta caafimaadka bulshada.[17] Tusaalooyinka HEI-yada la soojeediyay waxaa ka mid noqon kara hormarinta goobaha cagaaran iyo wanaajinta degaanada la dhisay; kordhinta helida taageerooyinka caafimaadka bulsheed iyo caafimaadka maskaxeed; burburinta cunsuriyadda qaabdhismeedka ah, sida dadaallada lagu ballaarinayo shaqaale dhaqan ahaan iyo luqad ahaan fahmayo bulshada; iyo ballaarinta helida guriyeynta iyo/ama xanaanada carruurta oo la awoodi karo. Waxaa

[17] Oo ay ku jiraan xogta tayo iyo mida tiro sida xogta REALD, SOGI iyo xogta kale ee dadka ee laga helay tirakoobka; iyo sidoo kale xog laga helay qiimeynta ku saabsan baahiyada ee ay bulshadu bilowday ee sharxaya baahiyada bulshada ee haatan jira iyo kuwa soo baxaya.

intaas dheer, iyadoo ku xiran baahiyada bulshada, HEI-yada waxay diirada saari karaan wax u qabashada dad gaar ah, sida carruurta iyo qoysaskooda, gaar ahaan kuwa ka tirsan dadka mudnaanta la siinayo. Marka CIC-yada loo oggolaado inay maalgeliyaan noocyada kala duwan ee taageero oo ay ogyihiin inay yihiin kuwa mudnaanta ugu sareysa leh, deeqda HEI waxay abuuri doontaa waxqabad bulsheed iyo adkeysi.

Tusaale ahaan, wax ka qabashada arrimaha la xiriira isbeddelka cimilada ayaa laga yaabaa inay mudnaan siiyaan qaar ka mid ah bulshooyinka Oregon. Isbeddelka cimilada—oo ah sababta ugu weyn ee gacan ka geysatay xilligii dab-duureedka aan hore loo arag ee Oregon ee 2020 iyo dhacdadii kuleylka darneyd ee 2021—ayaa inta badan si ka daran dadka kale u saameeya dadka midabka leh waxaana tani ugu wacan xaaladaha xaafadda ay deggan yihiin iyo kala -sooca deggenka,[18] saami aan caadi ahayn oo ah xaaladaha raagga,[19] iyo arrimo kale. Dab duureedkii 2020 ka dhacay Oregon wuxuu baabi'iyay bulshooyinka gobolka oo dhan, oo ay ku jiraan Talent iyo Phoenix, kuwaasoo ahaa 90% Latino/a/x. Kordhinta goobaha cagaaran iyo hormarinada kale ee lagu sameeyo deegaannada kale ee la dhisay, sida guryaha u adkeysan kara cimilada, ayaa wanaajin kara saameynta isbeddelka cimilada. Intaas waxaa dheer, caddaynta xiriirka u yeelayso wakhtiga banaanka lagu qaato iyo caafimaadka maskaxeed ee wanaagsan iyo isku-xirnaanta bulshada ayaa ah mid la taaban karo.[20]

Ogsoonow inaysan jiri doonin tiro hore loo cayimay oo ah deeqaha HEI; tani waxay ku xirnaan doontaa tirada CIC-yada ee codsada iyo xaddiga maaliyadeed ee la heli karo. Maalgalinta ayaa la qiimeyn doonaa iyadoo la adeegsanayo nidaamyo laga yaabo inay ku jiraan caddayn ku saleysan waxqabad ama caddayn ku saleysan bulshada, iyadoo diiradda la saarayo dadaallada qiimeynta ee ku-lug lahaanshaha bulshada iyo hoggaanka bulshada, sida cilmi-baarista kaqaybgalka bulshada ku saleysan (CBPR), mar kasta oo ay suurtogal tahay. CBPR waxay ku lug leedahay cilmi-baarayaasha iyo bulshada oo si wadajir ah uga qaybqaata dhammaan tallaabooyinka geedi-socodka cilmi-baarista waxayna noqon kartaa istaraatijiyad lagu wanaajiyo ururinta iyo fasiraadda xogta iyadoo isla markaana kor u qaadeysa caafimaadka bulshada waxna ka qabanaysa xaqsoor la'aanta caafimaadka.[21]

---

18 *Eeg tus.* Jesdale BM, Morello-Frosch R, Cushing L. 2013. Sida jinsiyadaha/qowmiyadaha u deggan yihiin dhulka leh halista kuleylka marka loo eego kala-sooca deegaanka. Environ Health Perspect 121(7):811–817, PMID: 23694846, 10.1289/ehp.1205919. Link-iga/xiriiriyaha, Google Scholar ; Davies IP, Haugo RD, Robertson JC, Levin PS (2018) U nuglaanta aan sinnayn ee bulshooyinka midabka leh ay ugu jiraan dab-duureedka. PLoS ONE 13(11): e0205825. https://doi.org/10.1371/journal.pone.0205825

[19] Daw, J. 2017. Sida afar cudur door uga ciyaaraan farqiga udhaxeeya jinsiyadda/qowmiyadda marka la eego halista dhimashada. **Jornaalka Marakanka ee** Daawada Cudurada Kahortaga. 52(1) kaabaha 1-aad: S95-S102. https://www.ajpmonline.org/article/S0749-3797(16)30322-1/fulltext

[20] https://willamettepartnership.org/wp-content/uploads/2014/06/HealthFramework-Final-Reduced.pdf

[21] *Eeg tus.* Salimi Y., Shahandeh K., Malekafzali H., Loori N., Kheiltash A., Jamshidi E., Majdzadeh R. Miyay Cilmi-baarista Kaqaybgelita Urur Bulsheedka Waxtar Leedahay? Dib U-eegid habaysan oo ku saabsan Waraaqaha Muddo Tobanaan Sano ah. Int. J. Prev. Med. 2012;3:386–393. https://www.ahrq.gov/research/findings/factsheets/minority/cbprbrief/index.html

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Barnaamijka Wacyigelinta Iskaashatada Bulshada (Community Partner Outreach Program) community.outreach@dhsoha.state.or.us ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.